

SIDA GANACSIGA LOOGA BILAABO MINNESOTA

Ganacsi ka billaabida Minnesota waxay ka kooban tahay saddex tallaabo oo aasaasi ah:

1. Qor qorshaha ganacsiga.
2. Dooro nooca ganacsiga.
3. Diiwaangeli ganacsigaaga.

Tallaabooyinkan waxaa si faahfaahsan loogu sharxay hoos. Marka aad bilaabeyso ganacsi cusub ama urur aan faa'iido doon ahayn waxaa jira go'aamo badan oo muhiim ah oo ay tahay in aad qaadato. Sharaxaadda soo socota waxaa loogu talagalay inay kaa caawiyaan hawshan.

Linkiyada bogagga kale waxaa lagu siiinayaa oo keliya u fududaynta macaamiisheena. Xafiiska Xoghayaha Gobolku ma dammaanad qaadayo saxsanaanta ama ku habboonaanta waxyaabaha ku jira websayd kasta oo naga baxsan.

Tilaabada 1: Qor qorshaha ganacsiga.

Waxaa jira khayraad/ilo badan oo la heli karo si ay kaaga caawiyaan heerarka qorshaynta bilowga ah ee bilaabista ganacsi ama urur aan faa'iido doon ahayn. Halkan waxaad ka [heli kartaa khayraad si uu kaaga caawiyo](#) hawshan.

Tallaabada 2: Dooro nooca ganacsiga.

Halkan waxaa ku yaalla dulmar kooban [noocyada guud ee ganacsiyada](#) laga heli karo Minnesota. Waxaa laga yaabaa inaad jeclaan lahayd inaad la tashato qareen, xisaabiye, ama mid ka mid ah ilaha/khayraadka kor ku xusan ka hor intaadan go'aan ka gaadhin nooca ganacsi ee aad samaynayso.

Tilaabada 3: Ka soo diiwaangeli (xaree) ganacsigaaga websaydkan, qof ahaan ama boostada ahaan. Ka eeg Sida loo Diiwaangeliyo ganacsigaaga hoos si aad u hesho macluumaad dheeraad ah.

Si aad isugu diiwaangeliso shakhsi ahaan ama boostada, soo buuxi dukumintiga loo baahan yahay. Ka eeg foomamka fayl garaynta guud:

<https://www.sos.state.mn.us/business-liens/business-forms-fees/general-business-filing-forms/>

XASUUSIN: In aad xafiiskeena ka diiwaangeliso ganacsigu kuma siinayo lambarka aqoonsiga cashuurta (tax ID).

La xirii <http://www.revenue.state.mn.us/Pages/default.aspx> si aad u hesho lambarka Aqoonsiga canshuurta gobolka.

Tag IRS si aad u hesho lambarka Aqoonsiga Canshuurta Federaalka.

Waxaa laga yaabaa inay jiraan noocyo kale oo shatiyo iyo caymis ah oo aad ugu baahan doonto ganacsigaaga. Ka eeg qaybta Macluumaadka Ganacsiga wixii macluumaad dheeraad ah.

Sida loo diiwaan geliyo ganacsigaaga

Ka hor inta aadan diiwaangelin ganacsigaaga waxaad u baahan doontaa inaad go'aan ka gaarto qaab-dhismeedka ganacsigaaga (Sole Proprietorship, Corporation, etc). Ka eeg Sida loo Bilaabo ganacsiga qaybta kore wixii macluumaad dheeraad ah.

Tallaabada 1: Naga samayso akoon internet ah oo soo gal ama soo gal akoon internetka ah oo jira oo khadka Internetka ah
<https://mblsportal.sos.state.mn.us/Account/Register>.

Tallaabada 2: Tag bogga <https://mblsportal.sos.state.mn.us/Business/Search> bogga raadinta oo guji nooca ganacsiga aad ee aad la jeclaan lahayd ganacsigaaga.

Tallaabada 3: Ka jawaab su'aalaha ku saabsan xaaladda aan faa'iido doonka ahayn iyo xaaladda xirfadeed.

Tallaabada 4: Xaqiiji magaca aad la jeclaan lahayd ganacsigaaga in la heli karo. Si aad tan u samayso, ku qor magaca aad soo dooratay sanduuqa raadinta. XASUUSIN: uma baahnid inaad ku qorto qaybta dhamaadka (LLC, Corporation, iwm) dhammaadka, adeegso diiwaanka hoos u furma si aad u rabto dibgaluhu in uu u soo baxo.

- Erayada "Bank" ama "Trust" looma oggola haddii aan loo isticmaalaynin siyaabo aan loola jeedin hay'ad maaliyadeed.
- Magaca ay ku jirto erayga "Insurance" ("Caymis") waa inuu sidoo kale ku jiraa beddelaha "Agency", "Broker", "Brokerage" or "Services" ("Wakaaladda", "Dilaal", "Dillaalnimo" ama "Adeegyo" ama beddelayaal la mid ah si loo muujiyo in ganacsigani uusan ku howlanayn wax caymisnimo ah.
- Bangiyada iyo shirkadaha caymiska kama xaraystaan Xafiiska Xoghayaha Gobolka. Taas badalkeeda, waa inay ka xareeyaan <http://mn.gov/commerce/>.

Tallaabada 5: Ku buuxi macluumaadka looga baahan yahay ganacsigaaga.

XASUUSIN: Xaraynta qaar ayaa laga yaabaa inay kaaga baahantahay inaad soo geliso dukumiintiga xaraynta oo pdf ah ama waxay kaa doonaysaa inaad soo qorato dukumiintigaaga diiwaangelinta ah haddii foomka aan la heli karin. Marka aad dhammaystirto dukumiintiga xaraynta, ka dibna ku keydi kombuyuutarkaaga faylka oo ah pdf ka hor intaadan soo gelinin. Waxaa muhiim ah in la ogaado in cabirku faylka uu ka yar yahay 2 megabytes. Magaca faylku waa inuu noqdo 10 xaraf ama wax ka yar oo ayna ku jirin xarakayn, meelo bannaan ama xarfo gaar ah. Haddii foomka PDF-ka aan loo heli karin nooca xarayntaada, waxaad soo dejisan kartaa dukumiinti aad si toos ah ugu abuurtay si aad ugu xarayso qaab pdf ah. Fadlan xasuusnow in magac

combiyutarka lagu qoray gunta hoose ee foomka, booska caadiga ah ee saxiixu, wuxuu qancinayaa shuruudaha sharci ee saxiixa.

Tallaabada 6: Waxaad fursad u heli doontaa inaad dib u eegto/hubiso xarayntaada dhammaadka hawsha. Ka dib marka aad dib u eegis/hubin ku samayso diiwaangelinta waxaad gujin kartaa "Submit" ("Dir"). Kadib waxaad heli doontaa Lambarka dalabka oo u gaar ah diiwaangelintaada. **Qoro lambarka Dalabka ka hor intaadan sii soconin.** Markaa kadibna guji badhanka "Continue to Make Payment" ("Usii soco Lacag Bixinta").

Marka aad gasho bogga US Bank waxaad fursad u heli doontaa inaad US Bank ka samaysato in aad akoonka adeega elektaroonig ah. Akoonka elektaroonigga ah ee US Bank ayaa wuxuu kayd in doona macluumaadka kaarkaaga bangiga si loogu isticmaalo khidmadaha ganacsiga mustaqbalka ah.

Waad dhinac mari kartaa iska diiwaangelinta adeegyada elektaroonigga ah ee US Bank adiga oo gujinaya "pay without registering". ("bixi lacagta adiga oo aan isdiiwaangelinin". Tani waxay kuu oggolaaneysaa inaad fuliso lacag bixin hal mar ah adiga oo adeegsanaya kaarkaaga bangiga.

Tallaabada 7: Kadib marka aad dhamayso lacag bixinta waxaad heli doontaa bog xaqiijin ah oo uu la socdo lambarka xaqiijinta lacag bixinta. **Soo daabaco bogga xaqiijinta ama qoro Lambarka Xaqiijinta.** Waxaad ka heli doontaa email xafiiskeena marka xaraynta la hawlgaliyo iyo sidoo kale email ka socda lacag bixinta oo ka socda US Bank.

Tallaabada 8: Marka aad ka hesho email xafiiskeena in xarayntii la hawlgeliyey waad furi kartaa emailka waxaana ku jiri doona link/xiriiriye aad gujin karto oo ku gaynaya websaydkeena halkaas oo aad kala soo deji karto nuqul ka mid ah diiwaangelinta.

XASUUSIN: Dhammaan diiwaangelinta waxaa lagu kayd inayaa Transaction History (Taariikhdaada Macaamilka) 90 maalmood. Taariikhda Macaamilka waxaad heli kartaa adiga oo ku soo galaya akoonkaaga internetka ee boggeena internetka oo ka dibna gujinaya Transaction History (Taariikhda Macaamilka). Markii aad gasho bogga Taariikhda waxaad gujin kartaa lambarka dalabka ee ku yaalla midigta waxayna ku siin doontaa ikhtiyaar aad ku soo dejisato faylka.

Sida loo cusbooneysiyo ama wax looga beddelo diiwaangelinta ganacsigaaga

OGAYSIIS: Milkiilayaasha shirkadaha mas'uuliyadaha xaddidan ee la sameeyey kahor-2015 ee Minnesota ka jira: Isbedelada soo socda ee sharciga ayaa saamayn ku yeelan doona ganacsigiina.

[Ka eeg https://www.sos.state.mn.us/business-liens/business-help/upcoming-llc-law-change/ wixii faahfaahin ah.](https://www.sos.state.mn.us/business-liens/business-help/upcoming-llc-law-change/)

Cusboonaysiinta Sannadlaha ah ee Ganacsiga:

Haddii aad xaraysay Shahaadada Magaca aad qaadatay, Shirkadda Ganacsiga ee Minnesota, Shirkadda Ganacsiga Dibadda ah (Shisheeye), ama Hay'ad aan Macaash doon ahayn, ama Iskaashato, Shirkad Mas'uuliyad Xaddidan, Iskaashato Mas'uuliyad Xaddidan ama Iskaashato Xaddidan, waa inaad xarayso cusboonaysiin sanadle ah hal jeer sanad kasta, laga bilaabo sanadka kaalandarka ee ka dambeeya wixigii aad asalka ahaan ka diiwaangelisay Xoghayaha Gobolka. Hay'addaada "si sharci ahaan ah ayaa loo baabi'in doonaa" (looma aqoonsan doono inay hadda ka jirto Minnesota) haddii aad ku guuldarreysato inaad soo xarayso cusboonaysiintaada sanadlaha ah. Haddii hay'addaada si sharci ahaan ah loo baabi'iyey, dib ayaad u soo ceshan kartaa (illaa iyo inta magaca weli la heli karo) adiga oo xaraysanaya cusbooneysiinta sanadka hadda socda oo bixinaya khidmadda.

Xafiiska Xoghayaha Gobolka Minnesota ayaa bilaabay hindise cusub oo loogu talagalay in si wanaagsan loogu adeego reer Minnesota iyo ganacsatada gobolka oo loogu magac daray "*Minnesota Business Snapshot*" ("*Sawirka Xaalada Ganacsiga ee Minnesota*"). Waa sahamin ikhtiyaari ah, shan su'aalood oo dhakhso ah oo hadda la siinayo ku dhowaad 550,000 ganacsiyo cusub iyo kuwii sii jiray oo ee yaalla Minnesota marka ay xaraynayaan cusboonaysiinta sanadlaha ah. Jawaabaha waxaa loo tixgeliyaa inay yihiin xog dadweyne mana jirto ciqaab haddii aad doorato inaad ka qaybgalin.

Sahaminta waxaa lagu soo ururiyey iyada oo ay la socdaan talooyinka shakhsiyaadka milkiilayaasha ganacsiyada ah, ururada ganacsiga, hay'adaha aan macaash doonka ahayn, iyo cilmi baarayaasha ka kala yimid daafaha gobolka kuwaas oo u arka inay tani tahay fursad wanaagsan oo fududeynaysa una sahlaysa ee ganacsiyada in ay aqoonsadaan la-hawlgalayaasha (partners), iyo hay'adaha dawliga ah iyo kuwa waxbarashada si ay si fiican ugu fahmaan bulshada ganacsatada gobolka. Waxaanu rajaynaynaa inaad tixgelin siin doonto ka qaybgalkeeda.

Xaraynta Wax ka Beddelka Ganacsiga:

Wax ka beddelka (beddelaada) waxaa lagu samayn karaa diiwaangelinta Ganacsiga haddii uu oggolaado qaanuunka sharciga ay hoos tagaani. Waxaad ka eegi kartaa sharciyada ganacsiga ee ku jira websaydka Dib u eegista Xeerarka <https://www.revisor.mn.gov/index.php>. Xoghaynta Gobolka ee Minnesota ma laha

foomam guud oo loogu talagalay dhammaan xaaladaha laakiin qaar badan ayaa laga heli karaa bogga foomamka la daabacan karo ee ku jira <https://www.sos.state.mn.us/business-liens/business-forms-fees/>.

Xarayn badan oo wax ka beddelka ah ayaa lagu xarayn karaa khadka internetka <https://mblsportal.sos.state.mn.us/Business/Search>. Dhammaan xaraynta wax ka beddelka waxaa lagu soo xarayn karaa boostada, ama miiska macaamiisha.

Sida Loogu Xareeyo Cusboonaysiintaada Sannadlaha ah ama Wax Ka Beddelka khadka Internetka:

Tallaabada 1: Naga samayso akoon internet ah oo soo gal ama soo gal akoon internetka ah oo jira oo khadka Internetka ah <https://mblsportal.sos.state.mn.us/Account/Register>.

Tallaabada 2: Aad raadinta Khadka Internetka ee Ganacsiga oo ah <https://mblsportal.sos.state.mn.us/Business/Search> oo ka raadi ganacsigaaga magaceeda ama lambarka faylkeeda.

- Haddii hay'addu aysan hadda shaqaynaynin waxaad u baahan doontaa inaad ka beddesho xaaladda xareynta ee raadinta oo aad ka beddesho 'Active' ("Shaqaynaysa") una beddesho 'Inactive' ("Aan shaqaynaynin") si aad u soo hesho hay'adda.
- Haddii hay'addu aysan hadda shaqaynaynin waxaad u baahan doontaa inaad dib u soo celiso hay'adda ka hor inta aan wax ka beddel la xareyn.

Tallaabada 3: Guji "Details" ("Faahfaahinta") ku dhinac xigta magaca ganacsigaaga ee ka soo baxday natiijooyinka Raadinta.

Tallaabada 4: Guji "File Amendment/Renewal" ("Xaree Wax-ka-Beddel/Cusbooneysiin") ee ku qoran bogga Faahfaahinta Diiwaanka Ganacsiga.

Tallaabada 5: Ka Dooro Wax ka Beddelkaaga ama Cusboonaysiinta liiska wax ka beddelka ee loo heli karo xaraynta. Dhammaan noocyada wax ka beddelka laguma heli karo in lagu fuliyo khadka internetka ah.

- "Diiwaangelinta khadka Internetka" ("Online Filings") waa diiwaangelin isla wakhtigaas dhacaysa waxayna abuuri doontaa ku diiwaangelinta macluumaadka aad bixiso.
- "Diiwaangelinta Degdega ah" ("Express Filings") waxay u baahan doontaa inaad soo geliso fayl-ka pdf ee diiwaangelinta. Dooro foomka PDF. Dhameystir oo ku keydi kombuyuutarkaaga, kahor intaadan soo gelinin. Waxaa muhiim ah in la ogaado in cabirku faylka uu ka yar yahay 2 megabytes. Magaca faylku waa inuu noqdo 10 xaraf ama wax ka yar oo ayna ku jirin xarakayn, meelo bannaan ama xarfo gaar ah. Haddii foomka PDF-ka aan loo heli karin nooca xarayntaada, waxaad soo dejisan kartaa dukumiinti aad si toos ah ugu abuurtay si aad ugu xarayso qaab pdf ah. Fadlan xasuusnow in magac combiyutarka lagu qoray

gunta hoose ee foomka, booska caadiga ah ee saxiixu, wuxuu qancinayaa shuruudaha sharci ee saxiixa.

Tallaabada 6: Ku buuxi macluumaadka loo baahan yahay iyo/ama soo geli foomkaaga wax ka beddelka.

Tallaabada 7: Dib u eeg/hubi Xaraynta, ka dibna guji "Submit" ("Dir"). Kadib waxaad heli doontaa Lambar dalabka oo u gaar ah diiwaangelintaada. Qoro lambarka Dalabka ka hor intaadan sii soconin. Markaa kadibna guji badhanka "Continue to Make Payment" ("Usii soco Lacag Bixinta"). Marka aad gasho bogga US Bank waxaad fursad u heli doontaa inaad US Bank ka samaysato in aad akoonka adeega elektaroonig ah. Akoonka elektaroonigga ah ee US Bank ayaa wuxuu kaydin doona macluumaadka kaarkaaga bangiga si loogu isticmaalo khidmadaha ganacsiga mustaqbalka ah.

Waad dhinac mari kartaa iska diiwaangelinta adeegyada elektaroonigga ah ee US Bank adiga oo gujinaya "pay without registering". ("bixi lacagta adiga oo aan isdiiwaangelinin". Tani waxay kuu oggolaaneysaa inaad fuliso lacag bixin hal mar ah adiga oo adeegsanaya kaarkaaga bangiga.

Tallaabada 8: Kadib marka aad dhamayso lacag bixinta waxaad heli doontaa bog xaqiijin ah oo uu la socdo lambarka xaqiijinta lacag bixinta. Soo daabaco bogga xaqiijinta ama qoro Lambarka Xaqiijinta. Waxaad ka heli doontaa email xafiiskeena marka xaraynta la hawlgaliyo iyo sidoo kale email ka socda lacag bixinta oo ka socda US Bank.

Tallaabada 9: Marka aad ka hesho email xafiiskeena in xarayntii la hawlgeliyey waad furi kartaa emailka waxaana ku jiri doona link/xiriiriye aad gujin karto oo ku gaynaya websaydkeena halkaas oo aad kala soo deji karto nuqul ka mid ah diiwaangelinta.

Link/xiriiriyuhu wuxuu shaqaynayaa oo keliya 90 maalmood.

XASUUSIN: Dhammaan diiwaangelinta waxaa lagu kaydinaayaa Transaction History (Taariikhda Macaamilka) 90 maalmood. Taariikhda Macaamilka waxaad heli kartaa adiga oo ku soo galaya akoonkaaga internetka ee boggeena internetka oo ka dibna gujinaya Transaction History (Taariikhda Macaamilka). Markii aad gasho bogga Taariikhda waxaad gujin kartaa lambarka dalabka ee ku yaalla midigta waxayna ku siin doontaa ikhtiyaar aad ku soo dejisato faylka.

Tilmaamaha Diiwaangelinta ee Ku Xaraynta Khadka Internetka iyada oo la adeegsanayo foomka pdf:

- Guji link-ga (xiriiriyaha) si aad u aaddo foomka PDF ee la buuxin karo.
- Fur oo macluumaadka ku buuxi foomka.
- Ka dib marka aad dhamayso, ku kaydi kombuyuutarkaaga.
- Xir foomka, adiga oo gujinaya "File" ("Faylka") oo ka xulo "Close" ("Xidh") diiwaanka hoos u dhaca.
- Waa inaad hadda soo geliso (upload) foomkaaga si aad u dhammaystirto hawsha xaraynta.

Tilmaamaha diiwaangelinta/xaraynta ee soo gelinta dukumiinti pdf ah:

- Soo geli foomka xaraynta ee aad hadda abuurtay adiga oo gujinaya badhanka "Upload file" "Soo Geli fayl".
- Gali macluumaadka loo baahan yahay oo guji "Continue" ("sii wad") si aad dib ugu eegto macluumaadkaaga diiwaangelinta.
- Dib u eeg macluumaadka aad bixisay oo guji "Submit Filing" ("Dir Diiwaangelinta").
- Guji "Continue to Make Payment" ("Usii soco Lacag Bixinta") haddii diiwaangelintaadu u baahan tahay lacag bixin.
- Kadib marka ay hawsha xarayntu dhammaato (oo lacag bixintaada la xaqiijiyay, haddii aad bixisay khidmad), waxaad heli doontaa email xaqiijinaya diiwaangelintaada.